



## **Waa maxay koox taageero?**

### **La cusbooneysiisay Setembar 2020**

Koox taageero waa markii qof kaligii guri degan (lagu magacaabo 'guri hal qof wayn keligii ku nool') ku biiro koox ka tirsan dad degan guri kale iyo la lahaado xiriir soke. Labadaan qoys waxay isla noqdaan koox taageero. Guri hal qof wayn keligii ku nool wuxuu ka kobnaan karaa:

- qof wayn ee keligii guriga ku nool laakiin daryeelayaal u soo booqdaan iyo caawiyaan, haddii tusaale ahaan leeyahay cudurka waalida/dhimirka (dementia). Daryeelayaasha waxay ahaan karaa qoys, saaxiibo, ama daryeelayaal mushaar qaato.
- qof wayn ee keligii guriga kula nool carruur.

Dadka guriga degan waxay qayb ka noqon karaan hal koox taageero oo keliya.

Waxaa ugu fiican inaad koox taageero la noqoto dad degan guri kuu dhow.

Laga bilaabo 14 Setembar 2020 ma beddeli kartid dadka ka kooban kooxda taageerida. Weli waad la kulmi kartaa kooxda taageerida xittaa haddii tiradiisa ka badan yahay 6 qofood. Talada ugu dambeeyey ee dowladda oo ku saabsan kooxda taageerida ka hel [halkaan](#).

Waxaad sii wadi kartaa inaad dad la kullanto meelo dibedda ah, ilaa 6 qofood ee ka socdo guryo kala duwan.

Waxaad xittaa la kulmi kartaa koox ka kooban 2 guri meel walba ha noqotee - meelo khaas loo leeyahay ama dadweynaha u furan, gudaha ah ama dibedda ah. Kani looma baahno inuu mar walba ahaado dad ka socda isla guriga. Qof walba ee ka kooban kooxda taageerida waxaa loo arkaa inay qayb ka yihiin hal guri.